

DEEQ GARGAAR EE KIRADA DHISMAHA EE COVID-19 (COVID-19 COMMERCIAL RENTAL RELIEF FUND)

Duqa Magaalada Walsh ayaa sameeyay **deeq gargaar ee kirada dhismaha ee COVID-19** kaas oo lagala shaqaynayo milkiilayaasha ganacsiga iyo milkiilayaashooda/hantiilahooda dhismaha si ay u sameeyaan iskaashi soo jireen ah si loo hubiyo in ganacsiyada ay ku sii furnaan karaan kana sii gudbaan COVID-19 Safmarka. Sanduuqan cusub ee la abuuray, oo ay maamusho ayna maarayso Xafiiska Duqa Magaalada ee Horumarinta Dhaqaalaha (OED), **waxay bilaabi doontaa aqbalida araaajida maalinta Isnitain, 16ka Nofeembar, 2020. Codsiyada ayaa xirmi doona maalinta Isnitain, 23ka Noofambar saacaddu markay tahay 9:00 am.**

Deeqa waxay:

- Taageeri doontaa milkiilayaasha ganacsiga iyadoo loo marinayo lacag toos ah oo milkiilayaasha dhismaha ganacsiga la siiyo
- Deeqo la siiyo milkiilayaasha lacag gaaraysa **ilaa \$15,000** si loo daboolo kirada inta u dhaxeysa 1da Abriil, 2020, iyo 31ka Diseembar, 2020, iyadoo laga wakiil yahay milkiilaha meheradaha yaryar.
- Samayn doontaa heshiis u dhexeeya mulkiilayaasha goobta ganacsiga iyo kiraystayaasha kaas oo u oggolaanaya kiraystayaasha inay sii joogaan meheraddooda ganacsi ugu yaraan 12 bilood ka dib markay helaan deeqda.

Ganacsiyada leh dukaamada wadooyinka saaran ee ganacsiga xaafadaha ku yaala waxaa lagu casuumay inay soo codsadaan Deeqda Gargaarka Kirada Ganacsiga (Commercial Rent Relief Fund).

Talaabooyinka lagu codsado:

1. Haddii aad tahay ganacsade daneynaya inaad soo dalbato, la xiriir mulkiilahaaga/ milkiilaha dhismaha ama haddii aad tahay milkiile dhismo hantiile daneynaya inaad codsato, la xiriir kiraystahaaga.
2. Milkiilayaasha meheraddu way ka buuxin karaan [COVID-19 Commercial Rent Relief Fund Tenant Application](#). Hantiileyaasha waxaa loola soo xiriiri doonaa talaabooyinka xiga **kadib** marka codsiga ganacsiga la helo.
3. Miliilayaasha dhismaha/hantida ee aan hadda ahayn kuwo [diiwaangashan sida ganacsi ahaan](#) Magaalada Boston waxay u baahan doontaa inay isdiiwaan geliso inta ay ku guda jiraan hawsha codsigooda si ay lacag ugu helaan.

shuruuddaha xaq u yeelashada ee loogu talagalay ganacsiga yaryar:

- Ganacsiyada waa inay lahaadaan in ka yar soddon iyo shan (35) shaqaale;
- Ganacsiyadu waa inay lahaadaan wax ka yar \$1,500,000 dakhli sanadle ah; iyo
- Ganacsiyadu waa inay ku lahaadaan goob ganacsi Magaalada Boston dhexdeeda xaafad ganacsi oo xaafadeed loo qoondeeyay. Ganacsiyada guryaha ka dhex jira xaq uma laha deeqdan.
- Ganacsiyada waa inaysan awooddi karin inay dib u furaan amar xiritaan darteed ee xaaladaha degdega ah (Wajiga 3, Tallaabada 2) ama si aan habboonayn u saameeyeen cudurka Safmarka ee COVID-19.
 - o **Si xun u saameeyay** waxaa loola jeedaa ganacsi ka mid ah ganacsiyada soo socda:
 1. Meelaha Cuntada
 2. Ganacsiga Tafaariiqda
 3. Adeegyada (dayactirka, shaqooyin (maintenance), adeegyada shaqsiyadeed)
 4. Fanka, Maaweelada, iyo Madadaalada
- Ganacsiyadu waa inay xiriir wanaagsan lalahaayeen milkiilaha dhismaha/milkiilaha hantida kahor 1da Abriil, 2020
- Ganacsiyada waa in Magaalada Boston ayna wax ku la'hayn

- Ganacsiyadu waa inay saxiixaan Heshiiska Milkiile Ganacsi/Heshiiska Kireystaha

Shuruudaha xaq u yeelashada mulkiilayaasha dhismaha/milkiilayaasha hantida

- Milkiilayaasha Dhismaha/Hantida waa in Magaalada Boston ayna wax ku la'hayn
- Milkiilayaasha Dhismaha/Hantida waa inay isdiiwaangaliyaan si ay ugu noqdaan Dukaanlayaal Magaalada Boston
- Milkiilayaasha Dhismaha/Hantida waa inay saxiixaan Heshiiska Milkiile Ganacsi/Qandaraaska Kireystaha

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo gargaar dheeraad ah, fadlan eeg:

- Bogga internetka ee Deeq Gargaar Ee Kirada Dhismaha COVID-19 ee : **[boston.gov/commercial-rent-relief](https://www.boston.gov/commercial-rent-relief)**
- Kooxdeena kala soo xiriir smallbiz@boston.gov.